

Waxay ku socotaa qofka guriga degan,

**WARBIXIN MUHIIM AH OO KU SAABSAN
BARNAAMIJKA MASHRUUCA DIB U
DHISKA GURYAHA (BIG HOUSING BUILD'S
REDEVELOPMENT PROGRAM)**

Homes Victoria waxay qoraalkan kuugu soo qoraysaa inay kula soo socodsiiiso halka ay wax u marayaan Barnaamijka Dib u Dhiska Guriyeynta Waa Weyn ee lagu dhawaaqay Sebtembar 2023 - si dadka loo siiyo guryo ka wanaagsan kuwii hore.

Iyada oo qayb ka ah Dhismaha Guriyeynta Waa Weyn, Dawladda Victoria waxay qaadaysaa tillaabada weyn ee xigta ee dib-u-horumarinta gurihii duqoobay ee bulshada ee ku yaal Melbourne oo dhan.

Maxaa maanta lagu dhawaaqay?

Maanta, waxaan ku wargelinay dadka deggan dhismayaasha soo socda in qorshahooda raritaanku uu bilaaban doono dhawaan howshuna dhamaan doonto Febraayo 2026:

- 259 Malvern Road, South Yarra
- 139 Highett Street, Richmond
- 111, 119 & 127 Elizabeth Street, Richmond
- 6 & 8 Anderson Court, Richmond
- 1-5, 7 & 9 Williams Court, Richmond.

**Taariikhda dhamaadka raritaanka ee
Flemington iyo North Melbourne ayaa
lagu dhawaaqay**

Waxaan sidoo kale kula talinay dadka degan dhismayaasha soo socda ee bilaabay qorshaynta raritaan dabayaaqadii 2023 in dib-u-guuritaankoodu uu dhamaanayo Sebtembar 2025:

- 120 Racecourse Road, Flemington
- 12 Holland Court, Flemington
- 33 Alfred Street, North Melbourne.

**Ma jiro dib-u-guuritaan kale oo ah
saraha dhaadheer oo bilaabmaya
Luulyo 2026 ka hor**

Ma fileyno in ay jiri doonto dib-u-guuritaan dambe oo saraha dhaadheer ah oo lagu dhawaaqi doono Luulyo 2026-da ka hor. Waanu idin la soo xidhiidhi doonaa marka ka guurista gurigaagu bilaabmayso.

Nala socio oo nagu xirnoow

Waxaad booqan kartaa [bighousingbuild.homes.vic.gov.au](https://www.bighousingbuild.homes.vic.gov.au) wixii macluumaad ah ee ku saabsan habka dib u dhiska iyo dib u dejinta, oo ay ku jirto macluumaad ku qoran luqadaada. Waad nala socon kartaa adiga oo isu diiwaan gelinaya wararka iyo ogeysiisyada joogtada ah.

Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad booqato goobta, la hadasho xafiiska guriyeynta deegaankaaga, aad ka qaybgasho kal-fadhiyada macluumaadka, oo aad anaga nala socoto.

Salaan diiran



Dannii de Kretser

*Maamulaha ku meel gaadhka ah,
Homes Victoria*

